



Warqada Xaqiiqda: Baadhitaanka shaqaalaha daryeelka da'da ee aan astaamaha laheyayn

30 Oktoobar 2020

Si loo caawiyo ilaalinta dadka deegaanka iyo shaqaalaha xarumaha daryeelka dadka da'da ah ee ay maalgeliso Dawlada Dhexe, Dawlada Australiya waxay baadheysaa shaqaalaha aanay ka muuqan calaamadaha COVID-19. Haddii aad qabtid fayras laakiin aadan muujinaynin astaamo, tani waxay ka dhigan tahay inaad tahay qof aan astaamo lahayn.

Baadhitaanku waa muhiim si loo caawiyo helitaanka dadka qaba COVID-19 ee ka shaqeeya daryeelka dadka da'da ah, ka hor inta aaney u muuqan kuwo aan caafimaad qabin. Tani waxay ka caawin doontaa hay'adaha caafimaadka, iyo loo shaqeeyayaasha inay aqoonsadaan halka gudbinta bulshada ay ka dhacayso, ka hor inta aanu dillaacin COVID-19.

Xusuusnow in baadhitaanka 'COVID-19' ay yihiin xili kaliya oo tilmaamaya aad xanuusan tahay. Qof kastaa waa inuu:

- ilaali tallaabooyinka nadaafadda
- Hubsid inay raacaan talo ku saabsan isticmaalka PPE iyo tallaabooyinka kale ee xakameynta infekshinka
- ka feejignow astaamaha COVID-19
- dib isku baadh haddii aad si fudud uu xanuun kuu qabto.

Isbaadhistu ma khasabbaa?

Maya, kaqeybgalka waa ikhtiyaari. Waxaan kugu dhiirigalineynaa inaad isbaadhid si aad ucaawisid naftaada iyo dadka deegaanka.

Baadhitaanku waxay ka caawineysaa loo shaqeeyahaaga, iyo mas'uuliyiinta caafimaadka inay helaan kiisas wanaagsan ka hor inta aanu dillaacin.

Ma u baahanahay inaan is go'doomiyo ka dib baadhitaanka?

Maya, uma baahnid inaad is go'doomisid ka dib qaadista baadhitaanka haddii aad fiicnaan dareentid oo aadan wax calaamado ah ka muujinaynin COVID-19.

Haddii aad isku aragto astaamo, si kasta oo ay khafiif u tahay, waa inaad guriga joogtaa oo aad raadsataa talo caafimaad.

Sideen ku ogaan karaa natiiyooyinkayga?

Haddii aad iska diiwaangelisid lambarkaaga moobiilka waxaad kuheli doontaa natiiyooyinkaaga baaritaanka togan ee qoraal ahaan.

Melbourne Pathology waxay si toos ah ugu soo gudbin doontaa wixii natiiyo wanaagsan ah ee COVID-19 Qaybta Caafimaadka Dadweynaha ee Victoria. Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku wargalin doonta adiga iyo xarunta daryeelka dadka da'da ah ee aad ka shaqayso.

Joog guriga haddii aad caafimaad daro dareentid ama haddii aad heshay natiiyo togan, raacna jiheynta Qeybta Caafimaadka Dadweynaha.

Miyaa laygu baadhi karaa rugta cudurada lagu baadho?

Haa, shaqaalaha daryeelka da'da ah ee Victoria waxay heli karaan baadhitaanka COVID-19 ee lacagta badan lagu bixiyo iyagoo booqanaya rug caafimaad oo gaar loo leeyahay. Fadlan soo qaado kaarkaaga Medicare iyo kaarka aqoonsiga si aad u muujiso inaad ka shaqeyneyso adeegga daryeelka dadka da'da ah ee Victoria. Haddii aadan haysan kaarkaaga Aqoonsiga, waxaad la iman kartaa caddeyn kale sida dharkaaga oo kale.

Miyaan isbaadhaa hadii aan horay uqaaday COVID-19?

Haddii aad fiicantahay oo aadan calaamado muujinayn, laakiin aad natiiyo taban aad heshey seddexdii bilood ee la soo dhaafay, in mar labaad lagaa baadho waxay kuu horseedi kartaa natiiyo taban oo been ah.

Waxaa jira caddeyn muujineysa in muddada saddexda bilood ee ku xigta natiijada baadhitaanka togan, fayrasku uu sababi karo in baadhitaan kasta oo dheeri ah uu noqdo mid aan sax ahayn.

Goorma ayey tahay in markale lay baadho?

Haddii ay ka soo wareegtay saddex bilood baadhitaankaaga taban ah, waa inaad ku biirtaa baadhitaanka astaamaha la'aanta ah ee ku faraxsan xaruntaada daryeelka da'da.

Haddii aadan caafimaad darantahay ama aad calaamado leedahay waa inaad isla markiiba raadsataa baadhitaan.

La xidhiidh Xarunta Kajawaabida Daryeelka Dadka Waaweyn ee Victoria si aad u heshid macluumaad dheeraad ah:

1800 413 957